Kooxda IDG ee DMCC

120 Emarat Atrium Building, Sheikh Zayed Rd, PO Box 50784,
Dubai, UAE

SIYAASADDA MAAREYNTA HUBKA IYO RASAASTA

Juun 2010

NOOCA 1.2

KOONTAROOLKA NOOCA

NOOCA	LASOO SAARAY	MUALIF	WAXAA IN LA SHAACIYO AMRAY
1	JUUN 10	I GORDON	I GORDON
1.1	NOFEEMBAR 15	G WINTER	I GORDON
1.2	MEY 19	G WINTER	G WINTER

TUSMO

TUSMO **1**

Arar **2**

SIYAASADDA MAAREYNTA HUBKA IYO RASAASTA **3**

1. Hordhac **3**

2. libka **3**

2.1. Hannaanka libka 4

2.2. Sharuudaha Tayada ee libka 4

2.3. In Dalka Gudihiisa Laga Soo Gado ama Lasoo Dhoofiyo, Shahaadooyinka Isticmaalaha ugu Dambeeya 4

2.4. Tixgalinnada Anshaxa 5

2.5. Tixgalinnada Sharciga 5

2.6. Qiimeynta codsiyada farsamo iyo kuwa ganacsiga 6

2.6.1. Qiimeyn Hawlgal 6

2.6.2. Qiimeyn Ganacsi 6

2.7. Guddoomidda Hub Cusub 7

3. Xareynta Hubka iyo Waxyaabaha Hubka lala Isticmaalo **7**

3.1. Maqsiinada Hubka 7

3.2. Qasnadaha 8

3.3. Safrinta 8

4. Badbaadada iyo Kartida Shaqaalaha **9**

4.1. Bixinta iyo Miisaamidda Rasaasta 9

4.2. Isticmaalka Hawlgalka 10

4.3. Dayactirka Hawlgalka 10

4.4. Kusoo Celinta Hubka Maqsiinka Hubka 11

© Ammaanka IDG 2015

Arar

Siyaasaddaan waa SIYAASAD GUUD. Waa talo loogu tala galay dhammaan mashaariicda meel walba ah ee adeegsada hub caynkuu ahaadaba. Waxay u baahan kartaa in wax laga baddalo wax ka baddalidaas oo loogu tala galay waxyaabaha gaarka ah ee sharciyada dalka martida loo yahay, xeer nidaamiyeyaasha dalka martida loo yahay, maqsiinka hubka iyo qasnadda, iwm.

Heerarka ugu yar ee halkaan lagu tilmaamay waa in la dhowro.

© Ammaanka IDG 2015

SIYAASADDA MAAREYNTA HUBKA IYO RASAASTA

1. Hordhac

Hubka, rasaasta, bulaleyrka iyo waxyaabaha qarxa waa in lasoo iibiyo, la maareeyo loona isticmaalo si waafaqsan koontaroollada ugu adag iyo heerarka badbaadada. Lahaanshaha iyo isticmaalka hubka si adag ayaa waxaa u koontaroola sharci Dawladeed oo IDG ay si buuxda u waafaqi doonto ayadoo u hoggaansami doonta dhammaan sharciga loo baahan yahay mar walba.

IDG waxaa saaran mas'uuliyadda loogu tala galay heerarka ugu sarreeya ee hubka, rasaasta iyo bulaleyrka koontaroolidooda si loo xaqiijiyo in hubku ammaan yahay had iyo jeer loolana tacaamulo si waafaqsan tixgalinta buuxda ee isticmaalkooda iyo saamaynta arrintaan ka dhalan karta.

Soo qaadidda iyo koontaroolidda hubka sida la fahmi karo waa mawduuc xasaasi ah; taa cawaaqibkeedu waa, shaqaalaha IDG waa inay qaddariyaan dhammaan sharciyada arrinkaan khuseeya ayna fahmaan in u hoggaansamid la'aani horseedi doonto tillaabo in la qaado.

Dadka isticmaalaya waa in shati ama sharci la siiyo kaasi oo ku saabsan inay qaadaan hubka caddeyn tan ku saabsanna waa in ay u diyaarsan tahay wixii hub ah ee IDG leedahay waqti walba.

Siyaasad gaar ah ayaa jirta oo loogu tala galay isticmaalka hubka markii waajibaad shaqo lagu gudanaayo; Isticmaalka IDG ee Siyaasadda Awoodda.

2. Iibka

Soo iibinta hub cusub wuxuu noqon karaa hannaan dheer oo adag oo dhib badan. Qarashka kulug leh guud ahaan waa mid wax ku ool ah tayada qalabka lasoo xushayna waxay ku leedahay saamayn qoto dheer awoodda IDG ku qabanayso shaqadeeda aasaasiga ah, taasoo ah gaar ahaan difaacidda macaamiisha.

Waxaa si wax ku ool ah u jira laba ilood oo uu ka yimaado hubka IDG; cusub, dalab la diray, loona soo dhoofiyay dalkii ku habboonaa ee hawlgalka ama, macmal lasoo isticmaalay, hub dalka gudihiisa laga keenay. Marmar aad dhif u ah IDG waxay doontaa inay soo gadato hub macmal ah oo horay loo soo isticmaalay laakiin aan lagu isticmaalin gudaha dalka loo wado ee loo soo dhoofiyay hubkaas.

Hubka IDG waxaa loo soo iibiyaa si ku salaysan sharuudaha tayada ee la qeexay (QR) oo laga soo helay qandaraaska, shardiga hawlgalka, sharci maxalli ah hannaankaanna waxaa wargaliya waayo aragnimada baahsan ee IDG u leedahay ka hawlgalidda deegaano hawlgal oo badan.QRs waxay caddeeyaan sifooyinka waxqabadka ee muhiimka ah ee loogu tala galay shaqooyinka oo inkastoo maareeyeyaasha goobta shaqada ku sugan ay qasab tahay inay sii wadaan inay go'aansadaan waxa ay u baahan yihiin, go'aannadooda waa in aad loogu tixgaliyo waana in lala qaato aqoon buuxda oo ku saabsan saamaynnada qarashka. Si sidaasi la mid ah, qiimeynta hubka tartamaya waa in loo sameeyo si saynis ku salaysan, aad loo qeexay oo daah furan si loo xaqiijiyo in qiimaha ugu wanaagsan ee lacag lagu baddasho la helay. Ugu

© Ammaanka IDG 2015

dambeyntii, laakiin sida ugu muhiimsan waa in dhammaan hubka loo soo iibiyo si anshax ah, aydoo si buuxda loogu hoggaansamayo sharciga gudaha dalka iyo kan caalamiga ah. Siyaasadaan warqadeedu waa jiho wax qeexeysa oo loogu tala galay dhammaan maareeyeyaasha u shaqeeya IDG ee ku lug leh soo iibinta hubka.

2.1. Hannaanka libka

Hannaanka iibka ee IDG wuxuu leeyahay saddex tillaabo oo muhiim ah:

- Qaabeynta qiimaha jaban ee Sharuudaha Tayada (QRs) si isticmaaleyaashu ugu helaan waxa ay u baahan yihiin qarashka ugu yar.
- Qiimeynta sharciga dalka gudihiisa ah iyo dadka wax qeybiya si loo xaqiijiyo in hubka loo soo iibiyo si sharci ah oo anshax ah.
- Qiimeynta codsiyada farsamo iyo kuwa ganacsi si daah furnaan ah, xaq ah oo aad loo qeexay ayadoo la adeegsanayo aalado saynis oo loogu tala galay isbarbardhigga wanaagsan ee shaqada hub walba.

2.2. Sharuudaha Tayada ee libka

QRs isbaddal ayaa lagu sameeyaa si loo qeexo hubka muhiimka ah ee loo baahan yahay waqti la cayimay si loo daboolo baahiyo hawlgal. Waxay sheegaan waxyaabaha loo baahan yahay marka laga hadlaayo sifooyinka waxqabadka si guud, dhisan oo la taaban karo. Haddii oraah kale lagu sheego, waxay qeexaan sifooyinka waxqabadka ee ugu yar ee hawsha ama hawlaha nidaamku inuu qabto ay tahay. QRs guud ahaan waxay ku xiran yihiin sababaha soo socda:

- Hawlaha hawlgalka ee cad ama maldahan ee IDG qandaraaska loo siiyay si ay u qabato.
- Awoodaha cadawga mustaqbalka, qorsheyaashiisa suuragalka ah iyo taatikooyinkiisa.
- Qaabka loo badinaayo ee adeegsiga qalabka ee goobta hawlgalka iyo xaaladaha cimilada.

Maadaama Maareeyeyaasha Dalka Qaabilsan ay yihiin isticmaaleyaasha ugu dambeeya, waa inay lahaadaan qawlka ugu dambeeya ee arrinka baadigoobka halbeegga. CMs waa inay tixgaliyaan saamaynta maaliyadeed ee go'aannada iibka, iyo waliba qandaraas ahaan, sugnaansho, tixgalin sharci.

2.3. In Dalka Gudihiisa Laga Soo Gado ama Lasoo Dhoofiyo, Shahaadooyinka Isticmaalaha ugu Dambeeya

Soo iibinta hubka ee dalka gudihiisa laga soo iibinaayo runtii waa xulasho qiime jaban. CMs waa inay sahmiyaan xulashadaan bilowgaba.

Si sidaasi la mid ah, ayna isku soo dhacayaan, dadaal waa in la sameeyo si loo fahmo hamuunta macaamiishu u qabaan bixinta Shahaadooyinka Isticmaalaha ugu Dambeeya (kuwaasi oo sharuud ah loo baahan yahay markii hubku cusub yahay) iyo wixii xannibaad ah oo loogu tala galay soo dhoofinta

© Ammaanka IDG 2015

hubka iyo soo galinta dalkii lagu dhex isticmaali lahaa. Mid ka mid ah sababahaas, waa haddii ay xumaan ay si wax ku ool ah meesha uga saareyso xulashada hub cusub oo laga soo gato meeshii ugu horreysay ee lagu iibinaayay.

2.4. Tixgalinnada Anshaxa

Markii la hirgaliyo QRs, liiska qeybiyeyaasha macquulka ah waa in la qoro. Heerka qeybiyeyaasha caalamiga ah waa in lagu soo daro dabcan, si kastaba ha ahaatee waa in daraasad la sameeyo si loo ogaado qeybiyeyaal dalka gudihiisa jooga haddii kani yahay hannaankii iibka hubka ee dalka hawlgalka gudihiisa ah ee ugu horreeyay.

'Sharraxaad Danayn ah' yacni codsi lagu muujinaayo mashruuca ayaa loo dirayaa qeybiyeyaasha, kaasi oo sharraxaad ka bixinaaya shardiga. Qeybiyeyaasha bixin kara hubka ee jooga kana bixin kara meesha lagu isticmaalayo oo qura ayaa un laga codsanayaa inay sharraxaad ka bixiyaan danayntooda mashruuca. Haddii macmiilku uusan dooneyn inuu bixiyo Shahaadada Isticmaalaha Ugu Dambeeya markaas looma baahna in soo saare hub arrinka lagu lug lahaysiiyo. Haddii cunaqabatayn hub ay saaran tahay dalka, marka sidaasi oo kale ma jiro wax qeybiye dibadda dalka ka imaanaya loo casuumayo oo qeybiyeyaasha dalka ku sugan ayumbaa la casuumayaa.

Markii la helo sharraxaado danayn oo wanaagsan xilku wuxuu saaran yahay Maareeyaha Shirkadda Dalka u Qaabilsan iyo kooxdiisa si ay u sameeyaan qiimeyn ku saabsan bal in qeybiyeyaashaashi ay waafaqeen sharuucda oo dhan. Sharuudaha ugu muhiimsan ee in la hubiyo ay tahay waa;

- In shirkaddu si buuxda shati u heysato ayna ka diiwaan gashan tahay dawladda dalkeeda si ay u iibiso hub

- Shirkaddu inaysan lahayn taariikh hore oo ku saabsan inay ka iibisay hub ururro argagaxiso ama dagaalyahannada dagaallo sokeeye oo horay u dhacay ama haatan socda.

- Shirkaddu inay leedahay awoodda, shaqo ahaaneed iyo sharci ahaaneed ee hub laga bixinayo meesha lagu isticmaalayo.
  Macnaha inay hubka u kala gooshin karto oo u safrin karto kana gudbin karto xaduudaha dawladaha haddii loo baahdo ama ay ku dhex safrin karto waddan gudihiis.

- Shirkadda in cunaqabateyn aysan ka saarneyn ama aysan ahayn urur caalami ah oo aan awoodin inuu soo dhoofiyo hub in cunaqabateyn hub ay saaran tahay dalkaas laga soo hadlay aawadeed.

Haddii lagu dhaco wax ka mid ah sharuudahaasi waxay keeneysaa in durba qorshaha laga saaro shirkadda lagu casuumayo qandaraaska.

2.5. Tixgalinnada Sharciga

Ugu dambeyntii, ka hor inta aan la daabacin Codsiga Lagu Dalbayo Soo Gudbinta Codsiyada Qandaraaska [RFP] kaasi oo loogu tala galay sharuudaha, faham buuxa oo guud oo sharci oo ku saabsan

© Ammaanka IDG 2015

hubka dalka hawlgalka ay tahay in laga dhex sameeyo waa in la helo. Tani waxay caadiyan u baahan doontaa oo kaliya inay dhacdo inta uu jirayo jiritaanka shaqo ee IDG ee dalka gudihiisa wuxuuna sida cad sigayaa inuu u baahdo isticmaalka talo sharci oo dibadda ka timaadda. In loo shaqeeyo sidii IDG gudaha dalal qaabka shaqo ee sharci ee ku hareereysan hannaanka hubka uu noqon karo kabkab sida ugu wanaagsan ee uu ahaan karo waxaa ugu muhiimsan in wixii sharci ah oo dhan la baaro lana fahmo ka hor inta aan la daabicin RFP.

2.6. Qiimeynta codsiyada farsamo iyo kuwa ganacsiga

Kadib markii codsiyada ka imaanaya qandaraasleyaasha la casuumay la helo, waa in la baaro oo la ogaado dhammaystirnimadooda iyo sida ay u waafaqayaan sharuudaha la qeexay. Waxay u baahan tahay baaritaan qoto dheer in lagu sameeyo dhammaan qeybaha meesha ka saaraya waxyaabaha sida khaldan loo turjumay ee xiga. Waa in sidoo kale la xaqiijiyo in dhammaan qandaraasleyaashu ay fahmaan qeexitaannada la dejiyay ayna soo gudbiyaan jawaabahooda ayagoo usoo gudbinaaya si aanu madmadow kujirin.

Codsiyada waxaa lagu soo gudbinayaa labo boqshadood oo kala duwan (waa codsi farsamo iyo mid ganacsi), inkastoo si isgarab socota ay yihiin. Codsiyada farsamo waa la furayaa si loo aqoonsado qandaraasleyaasha wax soo saarkoodu uu waafaqsan yahay dhammaan QRs ee wax laga iibsan karo. Hannaankaan waxaa loogu yeeraa qiimeynta farsamo. Si taas xigta, codsiyada qandaraaska ganacsi ee qandaraasleyaasha farsamo ahaan guuleysta waxaa loo furayaa si loogu tala galay qiimeynta ascaarta ee isbarbar dhigga ah.

Qiimeynta shaqada waxaa loo samaynayaa si maxalli ah oo hoos imaanaysa maareeyaha shirkadda dalka u qaabilsan, qiimeynta ganacsigana waxaa samaynaya Koox kadib markii ay la tashato maareeyaha dalka shirkadda u qaabilsan.

2.6.1. Qiimeyn Hawlgal

Waxaa loo sameeyaa si maxali ah. Qiimeyn hore oo warqadaha lagu sameeyo waxay baartaa dhammaan codsiyada farsamo ee loogu tala galay u hoggaansamidooda QR. Waa in sharraxaado dheeraad ah laga jiriyo qandaraasleyaasha, haddii loo baahdo.

Kadib markii qiimeynta lagu sameeyo, hubka lasoo bandhigay waa in qiimeyn goob la mariyo. Ujeedka ugu weyn waa in la xaqiijiyo halbeegyada waafqidda ee goobta saxda ah ee hawlgalka iyo xaaladaha cimilada. Waxyaabaha ku saabsan dayactirka iyo sii wadidda ayaa la baarayaa.

Maareeyaha dalka wuxuu ku kala xulan doonaa waxyaabaha la door bidayo ee shaqada, asagoo meesha ka saaraya hubka aan farsamo ahaan wanaagsanayn.

2.6.2. Qiimeyn Ganacsi

Waxaa samaysa kooxda IDG, oo ku salaysan xogtii laga helay xafiiska heer gobol/heer deegaan. Qandaraasleyaasha waxaa looga baahan yahay inay soo gudbiyaan qiimeyaasha dhammaan hubka sidii loogu soo saaray ayagoo waafaqsan. Waxyaabaha waaweyn ee ay tahay in qiimeyn lagu sameeyo:

© Ammaanka IDG 2015

- Qiimaha nidaamka hubka
- Qiimaha qalabka kale ee lala gado hubka (xirmada qalabka lagu nadiifsho hubka, tirada qasnadaha qori kasta, Weyneysooyinka)
- Qiimaha Qalabka Isbeerka ama Dayactirka ee ka Yimid Soo Saaraha.
- Qiimaha Aaladaha Gaarka ah ee Dayactirka iyo Qalabka Gaarka ee Tijaabada.
- Qiimaha tababarka lagu talo bixiyay.
- Qiimaha qalabka tababarka.
- Qiimaha qalabka in lasoo gado ay tahay ama in laiska daayo.
- Qiimaha hubka iyo qalabka loogu soo dhoofinaayo ilaa halka laga isticmaalayo

Kooxda IDG ayaa go'aansan doonta qiimaha ugu wacan ee xalka lacagta waxayn shaacin doontaa qandaraaslaha la door bidayo waxayna ogolaansho u siin doontaa iibka.

2.7. Guddoomidda Hub Cusub

Hubka waa la xisaabin doonaa sidii badeeco kale oo lasoo gaday oo kale. Nambarrada tixanaha ah waa in la diiwaan galiyo waana in loo qoondeeyo dabagalka hantida si loogu diyaariyo dusha Diiwaanka Hantida.

Hubka horay shirkaddu usoo isticmaashay waa in aad loo baaro ayadoo baaritaanka uu ku samaynaayo madaxa kaydka hubka waana in la sharribo oo uu sharribo qof awood u leh arrinkaas ka hor intii aan la bixin. Wakiilka maareyntu waa inuu xaadir ahaado markii la sharribayo si loo caddeeyo inuu ku qancay tayada hubka lasoo iibinayo. Hubka la aqoonsaday in 'Uusan Badbaado u Lahayn in La Bixiyo' waa in gooni loo dhigo oo si cad loogu dhajiyo calaamad muujinaysa. Hubkaa hadana waa in baaritaan dheeraad ah uu ku sameeyo oo / ama uu dayactiro madaxa kaydka hubka ee u qalma.

Habraacyada dalka martida loo yahay ee hubka waa in la raaco.

3. Xareynta Hubka iyo Waxyaabaha Hubka lala Isticmaalo

3.1. Maqsiinada Hubka

IDG Maqsiinadeeda hubka iyo Qasnadaha waa inay waafaqaan tusaalaha NATO ee loogu tala galay naqshadeynta, dhismaha, ammaanka, koontaroolidda qaadashada iyo xisaabinta hubka /rasaasta /bulaleyrka.

Hubka waa in lagu keydiyo maqsiin si gaar ah loogu sameeyay qorshahaasi. Soo galitaanka waa in la xaddido oo lagu koobo shaqaale la soo magacaabay oo shirkaddu ammaankooda ay fasaxday kadib markii ay hubisay. Maqsiinka hubka albaabkiisa waa in lagu xiro qofullo aad heerka ammaankoodu u sarreeyo oo *istiil* ah.

Fureyaasha waa in aad loo koontaroolo lana galiyo qasnad adag oo la xiri karo markii isticmaal

© Ammaanka IDG 2015

maalmeed aan loo adeegsan. Fureyaasha waa in bixintooda la saxiixo oo saxiix lagu bixiyo lana soo celiyo dhammaadka maalin kastoo shaqo. Shaqaalaha ogolaanshaha haysta oo qura ayaa loo ogolaan doonaa inay soo bixiyaan fureyaasha maqsiinka hubka.

Xubin ka tirsan kooxda maareynta ee IDG ayaa loo dhiibi doonaa hawsha si maalin kasta ah lagu hubinaayo in hubkii oo dhan uu yaalo oo waxba aysan ka maqnayn. Wax kastoo ka maqnaada waa in lagu soo wargaliyo durba Kooxda Maareynta Tasiilaadka. Intaasi waxaa dheer, maareyntu waa inay bilowdo hubinta boqolleyda hubka ee Maqsiinka hubka maalin walba ayadoo la hubinaayo.

Dhammaan hubka waxaa bixintiisa lagu xusayaa diiwaanka hubka shakhsiga la siinayo ayaana saxiixaya.

Hubka waa in la dhigo marfash hub oo hubka loogu tala galay loona sameeyay. Tani waxay abuurtaa nafaas badan oo soo baxa ama boos soo hara taasi oo sidoo kale saamaxda in hubka durba la tiriyo si wax ku ool ah. Wixii maqsiin hub ah waa in la nadiifiyo oo la hagaajiyo waqti walba. Qofka baqaarka ka shaqeeya ee mas'uulka ah waa in lagu dhiirrigaliyo inuu ku faano shaqadiisa sidaa yeelitaankeeda ayaana si dabiici ah u horumarin doonta waxtarka iyo ammaanka Maqsiinka hubka.

3.2. Qasnadaha

Markii ay macquul tahay rasaasta waa in si gaar ah loo xareeyo hubkana gaar oo aan la isku dhex darin, midba maqsiin u gaar ah.Tani waxay dhintaa in shilal dhacaan waxayna bixisaa heer dheeraad ah oo ammaan. In si taxaddar leh loo xareeyo rasaasta iyo walxaha qarxa runtii aad ayay muhiim u tahay marka loo eego sababo badbaado iyo kuwo hawlgal oo dhowr ah. Qofkii mas'uul looga dhigo xareynta rasaasta ama walxaha qarxa waa inuu diiradda saaro inuu ku guuleysto waxyaabaha soo socda:

- Rasaasta mirmirta ah waa in lagu xareeyo sanaadiiq bir ka samaysan nooc ahaan waana in si cad loo calaamadeeyo.
- Rasaasta waa in la galiyo weelkeedii asalka ahaa haddii ay macquul tahay.
- Rasaasta dhoolla tuska tababarka ah waa inaan lagu ag xareyn meel u dhow rasaasta dhabta ah ee nool nool.
- Dhig rasaasta meel sare (marfash ama kabarrada wax la dul saarto ee alwaaxda ah).
- Sanaadiiqda rasaasta waa in lagu qoro oo si cad loogu qoro inta ku jirta iyo nooca ay tahay.
- In meesha sigaar lagu dhex cabbo mamnuuc weeye oo calaamadaha mamnuuca waa in lagu dhajiyo meesha.
- Aaladaha dabka lagu damiyo waa in la dhigo meelo muhiim ah oo shaqaalaha waa in lagu tababaro isticmaalkooda.

Dhammaan rasaasta, walxaha qarxa iyo bulaleyrka waa in aad loo tiriyo si had iyo jeer ah oo

joogto ah. Marka la bixinaayo rasaas, dufcaddii ugu horreysay waa in marka hore la bixiyo.

© Ammaanka IDG 2015

3.3. Safrinta

Meel u qaadidda hubka iyo rasaasta waa arrin aad xasaasi u ah waana in si ammaankeedu gaarsiisan yahay sida ugu sugan hawshaasi loo sameeyo. Meel kale u qaadidda hubka iyo rasaasta waa in dabaqadeeda laga dhigo tillaabo la koontaroolay waana in mar walba la sameeyo ayadoo si buuxda loo kaashanaayo Waaxda Hawlgallada IDG. Tani waxay go'aamin doontaa heerka ammaanka ee tillaabadaan looga baahan yahay.

Sharruucda iminka jira iyo habraacyada lagu maamulo dhaqdhaqaaqa hubka iyo rasaasta waa in si aad ah loola socdo. Haddii loo baahdo dukumiintiyada saxda ah waa in lasoo qaato oo dadka ku lug leh dhaqaajinta waa in aad loogu sheego hannaanka.

Hubka iyo rasaasta waa inaan isku gaari lagu safrin. Amniga dartii, hubka qeybihiisa shaqeynaya waa in laga saaro waana in qeybahaasi loo safriyo si gaar ah. Hubka waa in loo calaamadeeyo si kastoo u qeexeysa dadweynaha waxa uu yahay waxa la sido.

Aaladaha dabka lagu damiyo waa in gaadiidka dushiisa la saaro gaar ahaan markii la qaadayo rasaasta iyo walxaha qarxa.

Qorsheynta iyo wargalintu waxay muhiim u yihiin fulinta tillaabooyinkaasi.

4. Badbaadada iyo Kartida Shaqaalaha

Hubka waxaa loo soo saari karaa shaqaale ka qeyb qaatay oo ku baasay tababarka hubka ee gudaha shirkadda. Markii uu ii dhammaysto, shaqaalaha waxaa loo arkayaa qof karti u leh inuu la tacaamulo hubka oo uu rido uuna sii wato tababar dheeraad ah oo hubka ku saabsan. Waxaa aad muhiim u ah in uu garan doono Habraacyada Badbaadada ee Caadiga ah (NSPs) oo loo nisbeeyo bixinta hubka.

Dhammaan shaqaalaha shirkadda ee u baahan inuu qaato hub waa inuu saxiixo shahaadada inuu u qalmo kartina u leeyahay hub sidashada, waana inuu sii saxiixo bare markii uu si lagu qanco u bogo tababarka la tacaamulka hubka ee habboon. Dukumiintigaan waa in loo heysto sidii inuu qeyb ka yahay galka shakhsiga u gaarka ah oo hay'adna usoo saartay in la siiyo hubka shakhsiyaad. Liiska shaqaalaha la tababaray ee lagu tababaray hubka waa inuu meel u yaalo IDG.

Tababarka hubku waa qasab oo aqoon aad heerarkeedu u sarreeyo waa in laga gaaro. Dhoolatusyada tababarka ah ee la tacaamulka hubka ayaa la baraa shaqaalaha IDG qaarkood waxaana tababarradaasi laga soo qaataa buugaagta yaryar ee isticmaalka hubka ee habboon, oo maareeye tababar oo ka socda IDG ayaa bixiya sharciyayn loogu tala galay tababarka la qaatay.

Meel qoryaha rasaasta looga saaro waa in had iyo jeer la adeegsado markii dhoollatus la samaynayo; meeshii meel sidaas ah aysan ku oollin hubka waa in lagu sii jeediyo meel badbaado leh. Iftiin ku filan waa in loo isticmaalo dhoollatus samaynta saacadaha mugdiga.

© Ammaanka IDG 2015

Badbaadada hubka waa in sare loo qaado had iyo jeer goob waliba. Waxaa arrintaan lagu guuleysan karaa in la qabto tababar wax is xasuusin ah oo joogto ah lana qabto sidoo kale markii maareeyeyaasha mashaariicdu booqasho ku imaanayaan ama ay booqasho ku imaanayso kooxda tababarku.

4.1. Bixinta iyo Miisaamidda Rasaasta

Dhammaan Waardiyeyaasha Hubeysan ee Caalamiga ah (IAGs) ee qandaraas ku shaqeeya ee ay tahay in la hubeeyo waa in loo soo saaro qoondeynta soo socota ee rasaasta iyo qasnadaha:

AK 47		
GOOBTA		
QASNADO	RASAAS LAYNKA HORE EE1AAD	RASAAS LAYNKA 2AAD
	7.62MM X 39MM	
10	600	300

QORYAHA			
GOOBTA			
QASNADAHA	RASAAS LAYNKA HORE EE1AAD		RASAAS LAYNKA 2AAD
	XM855	XM193	
10	100	500	100

QORYAHA			
GOOBTA			
QASNADAHA	RASAAS LAYNKA HORE EE1AAD		RASAAS LAYNKA 2AAD
	XM855	XM193	XM193
8	100	200	Note 1

BASTOOLAD		
GOOBAHA KABUL		
QASNADAHA	RASAAS LAYNKA HORE EE1AAD	RASAAS LAYNKA 2AAD
	9mm	9mm
4	40	0

Xasuusnow: Laynka 2aad ee Rasaasta ee goobaha Kabul ee gudaha fillada ama *Villa* waa in horay loo riixo oo muddo kale loo qabto taasi oo ku xiran xaaladda ammaanka.

Miisaamidda rasaasta, iwm.,waxaa laga yaabaa inay kala duwanaato qandaraasba sida ay yihiin sharuudihiisana waa in la raaco.

© Ammaanka IDG 2015

4.2. Isticmaalka Hawlgalka

Isticmaalka hawlgalka hubka loo isticmaalo ee ay adeegsanayaan shaqaale aqoon u leh oo u tababaran waxaa nidaamiya Habraacyada Hawlgalka ee Heerka Laisla Qaatay ah kuwaasi oo ay tahay in aad loo raaco lana dhaqan galiyo.

Markii la joogo goobaha qandaraaska, IAGs waa inay qaataan hubkooda mar walba ama waa inay joogaan meel aan hubi soo gaari karin haddii wax dhacaan. Maareynta iyo kormeereyaasha ayaa mas'uul ka ah xaqiijinta in arrintaan la hirgaliyo gudaha dhammaan qandaraasyada IDG.

4.3. Dayactirka Hawlgalka

Dhammaan hubka la xareynayo waa in garaasada laga saaro ama la nadiifiyo. Dayactiridda hubka ee joogtada ah waa muhiim; gaar ahaan nadiifin joogto ah barnaamijyo ay leedahay iyo wareejinta moollada qasnaddu waa muhiim. Qasnado buuxa ee la xareeyay taasi oo diyaargarow ah waa in la wareejiyo si loo dhimo cadaadiska moollada saaran. Nadiifin waa in la dhammaystiro ayadoo kormeer lagu hayo oo dhammaan hubka oo idil waa in baaritaan lagu sameeyo intaan maqsiinka lagu celin.

4.4. Kusoo Celinta Hubka Maqsiinka Hubka

Taxaddarka Badbaadada ee Caadiga ah (NSPs) waa in lagu sameeyo 'Halka Qoryaha Rasaasta looga Saaro' ka hor intii hubka aan loo gudbin Maqsiinka. Markii loo keenayo hub Ninka Haya Maqsiinka Hubka, shakhsiyaadku waa inay u tusiyaan si cad. Hubka lama qabanayo haddii arrintaan aan la yeelin.

Hubka waa in la nadiifiyo ka hor intaan lagu celin Maqsiinka lamana qabanayo illaa arrinkaan laga sameeyo.

Dhammaan wixii cillado ah ee soo gaara hubka waa in lagu soo wargaliyo qofka ka mas'uulka ah maqsiinka hubka oo cilladaha waa in la diiwaan galiyo oo lagu xuso Galka Cilladaha ayadoo lagu qorayo waqtiga iyo taariikhda maalinta lasoo tebiyay iyo waliba tillaabadii la qaaday. Hubkaa waa in gooni looga sooco hubka kale oo lagu dhajiyo kaarka cilladda kaasi oo caddeynaya ayna ku yaallaan taariikhda, waqtiga, cilladda, illaa Qofka Mas'uulka Hubka ka ah uu baaritaan uga samaynayo.

© Ammaanka IDG 2015